Nidaamka
Adeegyada Caafimaadka ee Fairview (Fairview Health Services)

Siyaasadda

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed

Ujeeddada:
Adeegyada Caafimaadka ee Fairview (Fairview Health Services) iyo HealthEast (wadajir ah, “Fairview”) ayaa taariikh dheer u leh in ay daryeel caafimaad oo tayo leh ugu deeqaan bukaanada ku jira bulshadeena si kastoo ay u awoodaan lacag bixinta. Fairview waxay aqoonsan tahay in laga yaabo in bukaanada qaarkood aanay awoodin in ay iska bixiyaan gebi ahaan ama qayb ka mid ah kharashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee caafimaadka loogu baahan yahay ee ay heleen maxaa yeelay ma haysanin daboolidda caymiska caafimaadka ama maxaa yeelay kharashkooda daryeelka caafimaadka ayaa dhaafsan lacagta ay awoodi karaan in ay bixiyaan. Si dadka baahi qaba loo siiyo Daryeelka Samafalka ah ama gargaarka kale ee maaliyadeed, waxay Fairview leedahay hawl ay ku qiimayso sida uu bukaanku ugu qalmo Daryeelka Samafalka Ah.

Bayaanka Siyaasadda ku Saabsan: Fairview waxaa ka go'an in ay wanaajiso caafimaadka bulshada. Waxaa siyaasaddan lagaga hadlayaa qaybaha kala duwan ee ka mid ah siyaasadda gargaarka maaliyadeed ee Fairview.

Qeexitaannada:

Baahida Caafimaadeed
Daryeelka caafimaadka loogu baahan yahay waa daryeelka, marka la raaco fikradda takhtarka/daaweeyaha daawaynta bixinaya ee ay Fairview aqoonsatay iyo marka la raaco heerka daryeelka, si macquul ah loogu baahan yahay:

- Si looga hortago bilowga ama ka sii darista cudur, xaalad caafimaad, ama naafo;
- Si loo soo ogaado cudurka;
- Si loo bixiyo daawaynta yaraynta xanuunka, saarista cudurka ama soo celiska xaaladda oo laga bixiyo xaaladaha caafimaadka jirka, habdhaqanka iyo/ama maskaxda; iyo/ama
- Si shakhsiga looga caawiyo in uu gaaro ama sii haysto kartida waxqabadka ee uu ku sameeyo waxqabadyada maalin walba, iyadoo la tixgelinayo kartida waxqabadka ee shakhsiga iyo weliba kartiyaha waxqabadka ee ku habboon shakhsiyaadka ay isku da' yihiin.
- Adeegyada caafimaadka loogu baahan yahay waxaa ka mid ah adeegyada bukaanjiif iyo bukaansocod ah ee lagu dhigay Cinwaanka XIX ee Sharciga Badbaadada Bulsheed ee Federaalka (Federal Social Security Act), iyo adeegga isbitaalka ee bukaanjiif ama bukaansocod ah ee lagu daboolo loona arko mid caafimaadka loogu baahan yahay marka la raaco Cinwaanka XVIII ee Sharciga Badbaadada Bulsheed ee Federaalka. Maxaa dheer, daryeelka ay xarun isbitaal ku bixiyaan iskaashi ama shirkadda nooca LLC taasoo uu isbitaalku ku leeyahay dan raasumaal ama macaash ayaa u qalma caawimada maaliyadeed. Waa in adeegyada loo fuliyo si ku toosan xeerasha qaran ee xirfadda caafimaadeed ee caadi ahaan la aqbalo waqtiga adeegyada la bixiyo. Waa in adeeg kaste uu dhanka qiyaasta, muddada, iyo baaxadda ugu filnaado in uu si macquul ah u buuxiyo ujeeddadiisa.
- Adeegyada caafimaadka loogu baahan yahay kuma jiraan adeegyada noocoodu yahay dhexgallada tijaabada ah ama qurxinta ah.
- Xaaladaha kale ee taageersan baahida caafimaadeed ee loo qabo daawayno gaar ah waxaa ka mid ah:
  - Caddaynta cilmisayniska ee tayo sarraysa ee lagu muujiyo in bukaanada qaba xaaladdan caafimaad ee gaarka ah ay ka faa'iido heli doonaan daawaynta la codsaday;
  - Nooca faa'iidada ayaa bukaanka muhiim u ah; oo/ama
  - Waxaa laga fiirsaday oo la iska dhaafay daawaynada nooc kale ah iyo dariiqyada bixinta daawaynta ee ka kharash yar.

Dhexgallada Tijaabada ah
Dhexgallada tijaabada ah waa daawayno iyo dhexgallo ama hawlo aanay caadi ahaan u aqbalin kuwo nabad ah oo waxtar leh khuburrada laanta habboon marka la soo ogaanayo, laga hortagayo ama la daawaynayo xaaladda caafimaad ee laga fiirsanayo. Marka la go'aaminayo in dhexgal uu tijaabo yahay, arrimaha habboon in laga fiirsado waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna:

- haddii dhexgalku uu diyaar ku yahay oo keliya daraasadda daawaynta ee uu qayb ka yahay;
- haddii maqaallada habboon ee ku jira wargeysyada ay filku dib u eegeen ay ku baaqayaan in daraasad ama baaris dheeraad ah lagu sameeyo dhexgalka loogu talagalay xaaladda caafimaad ee laga fiirsanayo; ama
- haddii dhexgalka loo isticmaali doono qayb kaloo jirka ka mid ah, si kaloo aad uga duwan, iyo/ama xaalad kaloo caafimaad, oo ka duwan sida ay caadi ahaan u aqbaleen khuburrada kale ee laanta habboon [gudaha Fairview, Labada magaalo ee Deriska ah (Twin Cities), Minnesota, Maraykanka, iwm.].

Culayska Aanan Canshuur Ahaan La Sii Wadi Karin
Xaaladda keenta in kharash badan uu saarmo urur Fairview ka mid ah oo canshuurta laga dhaafo si uu adeegga u bixiyo iyo marka ay timaaddo in tirada bukaanada suurogalka ah in ay adeegga u baahdaan ay ka dhigan tahay in ururku uusan isla adeeggaas bixin karin isagoo aanan si hagaagsan lacagta ugu celinin dhammaan bukaanada isla xaaladdaas ku sugan oo uusan canshuur ahaan mas'uul noqon karin.

Qoyska
Marka siyaasaddan laga hadlayo, qoysku waxa weeyaan:

- Labo lammaane oo is qaba iyo dadka ku tiirsan, sida ku qayaxan tilmaamaha IRS.
- Shakhsi haysta dad ku tiirsan sida ku qayaxan tilmaamaha IRS.
- Qof aanan xaas lahayn oo aanan haysanin dad ku tiirsan.

Tilmaamaha saboolnimada ayaa si gooni ah loogu eegi doonaa qoys kaste oo guri ku jira haddii gurigu uu ka kooban yahay in ka badan hal qoys.

Bixinta Daryeelka
Fairview waxay xaaladaha caafimaadka ee degdegga ah ka bixin doontaa baaritaannada lagu eego caafimaadka iyo adeegyada xasilinta iyadoon la eegayn haddii lacagta la bixin karo. (Fiiri siyaasadaha sharciga EMTALA ee HealthEast ama Fairview.)

Fairview waxay bixisaa adeegyada aanan degdegga ahayn ee, marka la raaco fikradda takhtarka dalbanaya ee Fairview ay aqoonsatay, caafimaadka loogu baahan yahay. Fairview waxay codsan kartaa in si ay ku qanacsan tahay loo diyaariyo nidaamyada lacagta lagu bixinayo ka hor inta aanan la bixinin adeegyada aanan degdegga ahayn. Nidaamyada lacagta lagu bixinayo waxaa ka mid noqon kara lacag caddaan ah ama kaarka deynka oo lagu bixiyo, caymis noociisa ay Fairview aqbasho, sicir dhimista aanan caymis lahayn iyo, marka la adeegsan karo, caawimada maaliyadeed (daryeelka sicir dhiman ama bilaashka ah) ee ay Fairview oggolaato. Adeegyo xul ah ayaa laga yaabaa in aanan loogu qalmin caawimada maaliyadeed. Wixii khuseeya xaaladaha aanan degdegga ahayn, waxay Fairview xaq u reebanaysaa in ay dib u eegto kiisaska gaarka ah ama codsiyada lagu rabo adeegyo gaar ah si ay u soo ogaato dariiqa ugu habboon ee loo mari karo daawaynta marka laga eego dhanka caafimaadka iyo anshaxa.

Sicir Dhimista Aanan Caymis Lahayn (Isbitaallada Fairview)
Bukaanada isbitaalka ee hela daawaynada aanan caymis lahayn sida ku qeexan heshiisyada Fairview iyo HealthEast ay la leeyihiin Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud (Attorney General's Office) ee hirgalaya bisha Juun 2017 ilaa bisha Juun 2022 (wadajir ah, "Heshiisyada") ayaa u qalmi doona sicir dhimis ("sicir dhimista aanan caymis lahayn").

I. U Qalmista Sicir Dhimista:

A. Bukaanada aanan caymis lahayn waxaa lagu soo ogaan doonaa nidaamka diiwaangelinta ka hor, diiwaangelinta ama jiifinta, ama xilliyo kaloo ka mid ah nidaamka qaansheegga iyo soo qaadista lacagta. Bukaanada aanan caymis lahayn, oo ay ku jiraan, laakiin aanan ku koobnayn, dhammaan bukaanada aanan caymis lahayn ee dakhliga gurigoodu uu u dhigmo ama ka hooseeyo $125,000, ee hela daawayn caafimaadka loogu baahan yahay ayaa u qalmi doona sicir dhimis aanan caymis lahayn oo u dhiganta sicirka qandaraaska Fairview ee lacag bixiyaha khaaska ah ee ugu dakhli badan.

B. Waxyaabaha ka reeban Sicir dhimista:
   1. Bukaanada aanan degganayn Minnesota ama Wisconsin waqtiga adeegga la bixiyo uma qalmaan sicir dhimista aanan caymis lahayn.
   2. Bukaanada hela adeegyo qurxin, la doorto, tijaabo ah ama kuwa kale ee aanan caafimaadka loogu baahnayn uma qalmaan sicir dhimista aanan caymis lahayn.
   3. Sicir dhimista aanan caymis lahayn waxaa loo hirgeliyaa oo keliya adeegyada isbitaalka iyo kuwa isbitaalka ku salaysan iyo adeegyo xul ah oo laga helo adeeg bixiyeyaasha isbitaalka u shaqeeya. Bukaanada hela adeegyada kiliniigga ee keli u taagan, adeegyo ka hela adeegbixiyeyaasha aanan

Fairview ku xirnayn, adeegyo ka hela ururrada ka mid ah Fairview ee uusan khusaynin Heshiiska Xeer ilaaliyaha Guud iyo adeegyada kale ee aanan isbitaalka ku xirnayn ma heli doonaan sicir dhimista aanan caymis lahayn.

II. Sicir dhimista lagu sameeyo Lacagaha Qaansheegga:

Heerarka sicir dhimista waxaa bilowga sanad kaste dejin doona Ku-xigeenka Madaxa Maamulka Dakhliga (Vice President of Revenue Management). Waxaa sicir dhimista lagu salayn doonaa sicirka lacagta isku celceliska ah ee lacag bixiyaha khaaska ah ee ugu dakhli badan ee Fairview looga celiyo adeegyada isbitaalka ku salaysan. Madaxa Maaliyadda (Finance Lead) ee goobta, Ku-xigeenka Madaxa Maamulka Dakhliga, iyo Ku-xigeenka Madaxa Wareegga Dakhliga (Vice President of Revenue Cycle) ama qofka u magacaaban ayay waajib ku tahay in ay oggolaadaan go'aannada ka baxsan tilmaamaha la dejiyey, iyagoo si fiican dib ugu eegaya duruufta kiis kaste loogu maleeyo.

Gargaarka Maaliyadeed

Ka sokow sicir dhimista aanan caymis lahayn, waxay Fairview gargaar maaliyadeed ka bixisaa adeegyada loogu qalmo iyadoo daryeel sicir dhiman siisa shakhsiyaadka buuxiya shuruudaha loogu qalmo. Daryeelka degdegga ah iyo adeegyada aanan degdegga ahayn ee uu dalbado takhtarka ay Fairview aqoonsatay ee, marka la raaco fikradda takhtarka dalbanaya, caafimaadka loogu baahan yahay, ayaa loogu qalmaa caawimada maaliyadeed, isla sida daryeelka ay xarun isbitaal ku bixiyaan iskaashi ama shirkadda nooca LLC taasoo uu isbitaalku ku leeyahay dan raasumaal ama macaash.

Adeeg bixiyeyaasha kale ee aanan shaqaale ahayn ee xarunta isbitaalka ku bixiya daryeel degdeg ah ama mid kaloo caafimaadka loogu baahan yahay ayaa ku taxan lifaaq la socda Siyaasaddan Gargaarka Maaliyadeed. Lifaaqa waxaa lagu sharxay haddii daryeelka laga helo adeeg bixiyeyaashan ay daboolayso Siyaasaddan Gargaarka Maaliyadeed.

Fairview waxay xaq u reebanaysaa in ay dib u eegis ku samayso codsiyada gargaarka maaliyadeed ee khuseeya adeegyada aanan degdegga ahayn si ay u baarto daawaynada nooc kale ah ama goobaha kale ee adeegga laga bixin karo iyo si ay u diiddo codsiyada gargaarka maaliyadeed ee dhalin doona xaalad ururka u keenaysa culays aanan canshuur ahaan la sii wadi karin.

Bukaanada daryeel ka hela Fairview waxaa laga sugayaa in ay qayb ka bixiyaan kharashka daryeelkooda taasoo ku salaysan lacagta ay bixin karaan. Gargaarka maaliyadeed ee Fairview laguma beddeli karo caymiska loo-shaqeeyuhu kafaale qaado, midka dawladda ama gaar ahaan loo iibsado. Si ay caawimada maaliyadeed ugu qalmaan, waxaa bukaanada laga sugayaa in ay:

- Qaataan fursadaha caymiska dawladda ama khaaska ah ee ay u qalmaan, oo ay xataa Fairview siiyaan wixii macluumaad ah ee ay u baahan yihiin si loogu daro barnaamijka caymiska ee ay dawladdu kafaale qaaddo.
- Raacaan shuruudaha codsashada gargaarka maaliyadeed, xataa bixinta dukumeentiyada loo baahan yahay.

U Qalmista Gargaarka Maaliyadeed

Fairview waxay u qalmista gargaarka maaliyadeed ku salaysaa dakhliga iyo hantida guriga. Foomka codsashada gargaarka maaliyadeed waa in la soo raaciyo warqad caddaynaysa dakhliga iyo hantida qoyska. Caddaynta dakhliga iyo hantida ee la aqbali karo waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda oo ku saabsan dhammaan dadka qaangaarka ah ee ka mid ah qoyska: labadii waraaqo yar yar ee mushaarka ugu dambeeyey, bayaannada muujinaya dheefaha Badbaadada Bulsheed (Social Security), shaqo la'aanta, naafada iyo masruufka xaaska/carruurta, bayaannada akownada bangiga iyo maalgelinta (ee lacag caddaan ah ama saamiyeed), iyo caddaynta canshuurta ee sanadkii ugu dambeeyey. Codsadeyaasha iskood u shaqaysta waxaa looga baahan yahay bayaanka dakhliga. Haddii uusan dakhli jirin, waxaa la aqbali doonaa bayaanka Caddaynta Dakhli La'aanta (Declaration of No Income).

Tilmaamaha dakhliga waxaa dib loogu eegi doonaa cusboonaysiinta Tilmaanta Saboolnimada Federaalka ee ay soo saarto Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid (Center for Medicare and Medicaid Services). Tilmaamaha dakhliga ee loogu qalmo caawimada maaliyadeed ee Fairview waxay kala yihiin sidatan:

Dakhliga qoyska oo u dhigma boqolleyda (%) Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka	Sicir dhimista boqolleyda ah ee laga jaro lacagaha guud (ee Baaqiga ka soo hara Sicir dhimista Aanan caymis lahayn)
0-200%	100%
201%-300%	50%

Tilmaamaha hantida ee loogu qalmo caawimada maaliyadeed ee Fairview waxay kala yihiin sidatan: Haddii hantida wadareed ee akownada bangiga ama hantida saamiyeed ee wadareed ee qoysku ay ka badan tahay $15,000 iyagu uma qalmaan Gargaarka Maaliyadeed. Haddii hantida wadareed, xataa lacagta hawlgabka, ay ka badan tahay $500,000 iyagu uma qalmaan Gargaarka Maaliyadeed.

Fairview ma isticmaali doonto barnaamij kumbiyuutar oo u qalmista loogu maleeyo si ay bukaanada ugu oggolaato ama ugu diiddo caawimada maaliyadeed. Wixii khuseeya bukaanada loo go'aamiyo in ay hadda u qalmaan Gargaarka Caafimaadeed (Medical Assistance) ama barnaamijka Minnesota Care (wadajir ah "MA"), baaqiga bukaanka ka baxa ka hor taariikhda hirgalka MA ayaa u qalmi doona caawimada maaliyadeed.

Ka Shaqaynta Codsashooyinka Gargaarka Maaliyadeed

- Fairview waxay latalin maaliyadeed siin doontaa bukaanada iyo qoysaskooda si ay uga caawiso in ay soo ogaadaan fursadaha habboon ee lagu dabooli karo waajibaadka maaliyadeed. Bukaanada sheegta darxumada maaliyadeed waxaa la siin doonaa codsashada gargaarka maaliyadeed.
- Si uu qofku gargaarka maaliyadeed u dalbado, waa in uu buuxiyo codsashada gargaarka maaliyadeed oo uu bixiyo dukumeentiyada loo baahan yahay ee ku saabsan dakhliga iyo hantida qoyska (halkan hoose eeg). Waxaa codsashada gargaarka maaliyadeed bilaash lagu heli karaa marka Adeegga Macmiilka (Customer Service) ee HealthEast laga waco lambarka 651-232-1100, Adeegga Macmiilka ee Fairview laga waco lambarka 612-672-6724 ama Adeegga Macmiilka ee Fairview Range laga waco lambarka 218-362-6624. Waxaa codsashada gargaar laga heli karaa marka xataa lambarradan la waco.

Bukaanka aanan hore u tilmaamin in uusan lacagta bixin karin waxuu la xiriiri karaa Adeegga Macmiilka HealthEast, Adeegga Macmiilka Fairview ama Adeegga Macmiilka Fairview Range ka dib marka uu qaansheeg helo, ama Lataliye Maaliyadeed (Financial Counselor) ayaa bukaanka la xiriiri kara. Wakiillada Adeegga Macmiilka ayaa bukaanka u gudbin doona shaqaalaha habboon si uu u dalbado barnaamijyada gargaarka dawladda ee habboon, waxayna bukaanka u baari doonaan u qalmista caawimada maaliyadeed. Codsadeyaasha gargaarka maaliyadeed waxaa la siin doonaa foom codsasho.

- Foomamka codsashada ee la buuxiyey waxaa loo gudbin doonaa Isuduweyaasha Daryeelka Samafalka ah.
- Haddii codsasho ay qayb ka maqan tahay loo soo celiyo Fairview, waxaa qofka mas'uulka ah loo diri doonaa telefoon iyo/ama warqad si loogu macneeyo waxa loo baahan yahay.
- Waxay Fairview ogaysiin qoraal ah ka bixin doontaa go'aannada ay ka gaarto gargaarka 30ka maalmood ee taariikheed ee ku xiga helitaanka codsashada gargaarka maaliyadeed ee dhammaystiran. Waxaa ogaysiintan ku jiri doona heerka dhimista ku toosan lacagta uu bukaanku bixin karo. Waraaqaha diidista ah waxaa lagu dari doonaa sababta ka dambaysa diidista iyo tilmaamaha laga bixinayo nidaamka uu bukaanku adeegsan karo si uu u dalbado in codsashada dib looga fiirsado. Go'aanka lagu go'aamiyo u qalmista gargaarka maaliyadeed waa mid hirgalaya (waxuu qaban doonaa daryeelka la bixiyo ee si kale u daboolaya waajibaadka siyaasaddan) muddo 6 bilood ah iyadoo aanan loo baahnayn in mar kale la dalbado.
- Waxuu bukaanku codsan karaa in mar kale laga fiirsado go'aanka laga gaaro u qalmista gargaarka maaliyadeed ee Fairview isagoo qoraal ku soo diraya macluumaad dheeraad ah, sida caddaynta dakhliga ama sharraxaadda duruufta shuruudaha fududaynaysa, oo uu ansixiyaha magacaaban ugu diro 30 maalmood gudahood ka dib ogaysiinta diidista ah. Haddii diidistii hore ee u qalmista gargaarka maaliyadeed dib loo xaqiijiyo, waxaa ogaysiin qoran loo diri doonaa qofka mas'uulka ah. Inta lagu gudo jiro hawsha dib uga fiirsashada waxaa la hakin doonaa dabagalka soo qaadista lacagta ka maqan xisaabaha.
- Sicir dhimista Gargaarka Maaliyadeed waxaa la saari doonaa baaqiga ka soo hara xisaabaha la ansixiyo ama la oggolaado ka dib codsashada sicir dhimista aanan caymis lahayn haddii bukaanku ugu qalmo shuruudaha Heshiiska. Ka dib marka laga go'aan gaaro u qalmista gargaarka maaliyadeed, shakhsiga u qalma gargaarka maaliyadeed laguma dallaci doono in ka badan caddadka guud ahaan loo qaansheego

(amount generally billed) (AGB) shakhsiyaadka caymis u haysta daryeelka degdegga ah ama midka caafimaadka loogu baahan yahay. Caddadka AGB waxaa isbitaal kaste loogu xisaabiyaa nidaamka dib u fiirinta lacagta laga soo celiyey dhammaan xisaabaha ganacsatada iyo barnaamijka Medicare ee sanadkii canshuureed ee hore. Xaashi macluumaad oo qeexaysa qiyaasta boqolleyda ah ee caddadka guud ahaan la qaansheego ee Fairview ayaa bilaash lagu heli karaa marka Adeegga Macmiilka ee HealthEast lagala xiriiro lambarka 651-232-1100, Adeegga Macmiilka ee Fairview lagala xiriiro lambarka 612-672-6724 ama Adeegga Macmiilka ee Fairview Range lagala xiriiro lambarka 218-362-6624.

Bukaanka ayaa ka mas'uul ah baaqiga soo hara ka dib marka la hirgeliyo sicir dhimista gargaarka maaliyadeed. Haddii baaqiga lagu bixin waayo waqtiga la dhigo, waxaa xisaabta lagaga shaqayn doonaa nidaamka caadiga u ah soo qaadista lacagaha, kaasoo ku sharraxan siyaasadda Qaansheegga iyo Soo qaadista lacagaha ee Fairview, oo laga heli karo halkanwww.Healtheast.org ama www.Fairview.org Fairview ma aqbasho mana oggola in wakiilladeedu ay la yimaaddaan habdhaqanno xadgudub leh ama sharci darro ah marka ay lacagta soo qaadayaan.

Daabacaadda Diyaar Ahaanta Gargaarka Maaliyadeed
Fairview waxay dadweynaha kaga wargelin doontaa siyaasaddeeda gargaarka maaliyadeed habab kala duwan, sida daabacaadda siyaasadda gargaarka maaliyadeed, foomka codsashada gargaarka maaliyadeed, iyo soo koobista qoraal cad ku dhigan oo ay siyaasadda gargaarka maaliyadeed kaga bixiso baraha internetka HealthEast ama Fairview (www.Healtheast.org ama www.Fairview.org), xataa soo koobista qoraal cad ku dhigan oo ay ka bixiso siyaasadda gargaarka maaliyadeed, qoraallo elektaroonig ah (marka uu bukaanku oggolaado) ama warqad ku daabacan oo ay bukaanada ugu diyaariso meelo dadweynaha u furan oo ku yaalla isbitaalka iyo kuwaasoo ay ku dirto boostada ama iimaylka (marka uu bukaanku oggolaado), iyadoo si cad ugu muujisa dadweynaha waaxda gurmadka degdegga ah ee isbitaalka gudihiisa iyo meelaha loo maro jiifinta isbitaalka, iyo bayaannada qaansheegga ee bukaanka. Fairview waxay xubnaha bulshada ee ay Fairview u adeegto kaga wargelin doontaa oo ay ku ogaysiin doontaa siyaasaddeeda gargaarka maaliyadeed barteeda internetka, warsideyaasheeda, iyo nuqullada buug warbixineedyada gargaarka maaliyadeed oo ay xubnaha bulshada ka siiso Kiliniigyada Fairview.

Magac Kale u Yeelidda Daryeelka Samafalka ah/Gargaarka Maaliyadeed
Fairview waxay go'aansan kartaa in aanay lacag ka codsanin baaqiga ku jira xisaabta bukaanka marka nidaamka soo qaadista lacagta ee caadiga ah lagu soo ogaado in aanan lacagta la bixin karin. Marka go'aankayaga ah in aanan lacag codsanin uu ku salaysan yahay darxumada maaliyadeed ee bukaanka, waxay Fairview magac kale u yeeli doontaa baaqiyadan oo ay ugu yeeri doonto caawimada maaliyadeed ama gargaarka samafalka ah, marka uu oggolaado Agaasimaha Wareegga Dakhliga ee Nidaamku ama qofka u magacaaban.

Kharashyada ka Badan Lacagta ay Dawladdu Soo Celiso
Kharashyada la magdhabi waayo ama la soo celin waayo ee ka yimaadda Medicare, Medicaid iyo barnaamijyada daryeelka saboolka ee gobolka/degaanka waxaa loogu daraa dheef bulsho ahaan sababtoo ah farqiga badan ee u dhexeeya kharashyada dhabta ah iyo lacagta la soo celiyo.

Barnaamijka Daryeelka Samafalka ah

- Lifaaqa A waxaa ku jira maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan u qalmisyada Daryeelka Samafalka ah.
- Lifaaqa B waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan been abuurka macluumaadka.
- Lifaaqa C waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wadashaqaynta iyo isticmaalka caymiska.
- Lifaaqa D waxaa ku jira maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha ka reeban Daryeelka Samafalka ah.
- Lifaaqa E waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha kale ee sicir dhimista ka jira.
- Lifaaqa F waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaansheegga iyo soo qaadista lacagaha.

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed Lifaaqa A

U Qalmista Barnaamijka Daryeelka Samafalka ah

- Adeegyada degdegga ah iyo kuwa caafimaadka loogu baahan yahay oo keliya ayaa loogu qalmaa Daryeelka Samafalka ah. Fairview waxay xaq u reebanaysaa in ay kiis kasteba si gooni ah ugu go'aamiso haddii adeegyadu ay buuxinayaan qeexitaanka “caafimaadka loogu baahan ahay” marka la eego u qalmista Daryeelka Samafalka ah.
- Si uu bukaanku ugu qalmo Daryeelka Samafalka ah, waa in uu buuxiyo tilmaamaha dakhliga iyo hantida ee soo socda:
  1. Heerka Dakhliga: Dakhliga wada socda ee sanadkii ee guriga bukaanku waa in uu u dhigmo ama ka hooseeyo boqolkiiba 300 (300%) Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) (FPL).

Xuduudda Dakhliga ee ku toosan Qiyaasta Qoyska

Qiyaasta Qoyska	Dakhliga Guud ee Sanadkii (200% FPL)	Dakhliga Guud ee Sanadkii (300% FPL)
1	$24,980	$37,470
2	$33,820	$50,730
3	$42,660	$63,990
4	$51,500	$77,250
5	$60,340	$90,510

  2. Tilmaamaha hantida ee loogu qalmo caawimada maaliyadeed ee Fairview waxay kala yihiin sidatan: Haddii hantida wadareed ee akownada bangiga ama hantida saamiyeed ee wadareed ee qoysku ay ka badan tahay $15,000 iyagu uma qalmaan Gargaarka Maaliyadeed. Haddii hantida wadareed, xataa lacagta hawlgabka, ay ka badan tahay $500,000 iyagu uma qalmaan Gargaarka Maaliyadeed.

  3. Faahfaahinta ku saabsan dukumeentiyada loo baahan yahay si loo xaqiijiyo dakhliga iyo hantida waxaa laga heli karaa halkan hoose qaybta “Nidaamka Codsashada” hoosteed.

- Xisaabinta Dakhliga:

- Wixii khuseeya dadka qaangaarka ah, ereyga “Dakhliga Wadareed ee Sanadkii” ee ku jira Codsashada Daryeelka Samafalka ah waxaa looga jeedaa lacagta dakhliga guud ee sanadkii ee codsadaha iyo xaaska codsaduhu ay meel walba ka helaan. Haddii codsaduhu uu carruur yahay, ereyga “Dakhliga Wadareed ee Sanadkii” waxaa looga jeedaa dakhliga guud ee wada socda ee waalidka iyo/ama mas’uulka sharciyeed ee codsadaha. Tirada “Dakhliga Wadareed ee Sanadkii” ee loo isticmaalo Codsashada Daryeelka Samafalka ah waxaa looga jeedaa dakhliga caddayn loo hayo oo sanadka loo xisaabiyo muddo 12 bilood ah. Waxaa la codsan doonaa ugu yaraan caddaynta dakhliga 2dii bilood ee ugu dambeeyey si loogu caawiyo xisaabinta dakhliga sanadkii hadda la helo. Haddii aanan la heli karin caddaynta dakhliga 2dii bilood ee ugu dambeeyey, waxuu bukaanku bixin karaa caddadka ugu soo dhow ee laga helay dakhliga wadareed ee sanadkii ee caddayn loo hayo. Daryeelka Samafalka ah lama oggolaan karo haddii bukaanku uu dhinac kale ka helo heshiis maaliyadeed oo la xiriira daryeelka ay bixiso Fairview kaasoo ku filan in lagu bixiyo dalbashooyinka maqan maadaama lacagahaas la filayo in lagu buuxiyo baaqiga ay Fairview bukaanka ku leedahay. Bukaanka codsada Daryeelka Samafalka ah waxuu ka soo warbixin doonaa tirada dadka ku nool guriga bukaanka si loo go'aamiyo qiyaasta reerka, dakhliga, iyo hantida oo loogu kala saaro sidatan:

  Dadka qaangaarka ah: Marka la xisaabinayo tirada dadka ku nool guriga codsadaha qaangaarka ah, waxay Fairview ku dari doontaa codsadaha, xaaska codsadaha, iyo dadka sharci ahaan ku tiirsan.

  Dadka carruurta ah: Marka la xisaabinayo tirada dadka ku nool guriga codsadaha carruurta ah, waxay Fairview ku dari doontaa codsadaha, aabbaha/mas’uulka codsadaha, hooyada/mas’uulka codsadaha, iyo dadka ku tiirsan aabbaha, hooyada ama qofka carruurta ah.

  Waalidka guriga la deggan ilmahooda qaangaarka ah laguma dari doono qiyaasta ama dakhliga guriga ilmahaas haddii aanan dukumeentiyo sharciyeed oo rasmi ah lagu caddayn karin mas’uuliyadda/maaraynta (conservatorship) ee sharciyeed.

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed Lifaaqa B

Been-abuurka Macluumaadka

- Been abuurka Macluumaadka:
    - Been abuurka macluumaadka dakhliga ama diidista in Fairview lala shaqeeyo waqtiga lagu gudo jiro nidaamka codsashadu waxay keeni doonaan in la diido Codsashada Daryeelka Samafalka ah. Ka dib marka codsadaha loo oggolaado Daryeelka Samafalka ah, haddii Fairview ay ogaato in uu been yahay qodob muhiim ah oo ku jira codsashada Daryeelka Samafalka ah, waxaa laga yaabaa in codsashada Daryeelka Samafalka ah iyo Daryeelka Samafalka ah ee la oggolaaday laga noqdo taasoo ay go'aaminteeda Fairview keligeed ikhiyaar u leedahay.

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed Lifaaqa C

Wadashaqaynta Barnaamijka Daryeelka Samafalka ah iyo Isticmaalka Caymiska

Maadaama uusan Barnaamijka Daryeelka Samafalka ah beddel u ahayn mas'uuliyadda shakhsi ahaaneed, dadka raba in ay Barnaamijka ku helaan gargaarka maaliyadeed waxaa laga sugayaa in ay ka qayb galaan ama wadashaqayn ka muujiyaan nidaamyada ay Fairview ku go'aamiso u qalmista oo ay qayb ka bixiyaan kharashka adeegyada inta ay shakhsi ahaan karayaan. Fairview waxay shakhsiyaadka awood maaliyadeed u leh ku dhiirrigelinaysaa in ay iibsadaan caymiska caafimaadka si ay caymis ugu helaan adeegyada caafimaadka ee ka hortagga ah ee ay qaataan iyo si ay u dhawraan hantidooda gaarka ah. Waxaa la baaraa bukaanada dhammaantood waxaana looga baahan karaa in ay MNsure ka dalbadaan Medicaid, MinnesotaCare, Qualified Health Plan (Qorshaha Caafimaadka ee Loo qalmo) ama caymis lagu daboolo daryeelka caafimaadka oo ah nooc kale oo la aqbali karo sida ku qayaxan Sharciga Daryeelka La awoodi karo (Affordable Care Act) (ACA) si loogu garto wadashaqaynta, haddii ay u qalmaan.

- Haddii ay suurogal tahay in bukaanku uu u qalmo dhinac kaloo uu lacagta ka helo oo uu wadashaqayn muujin waayo sababtoo ah duruufo shuruudaha ka fududaynaya oo ka baxsan xukunka bukaanka, waxaa bukaanka laga codsan doonaa in uu keeno warqad sharraxaad ah. Waxaa warqadda dib u eegi doona maamulka Fairview.
- Bukaanku uma qalmi doono Daryeelka Samafalka ah ama Barnaamij kaloo ka mid ah Gargaarka Maaliyadeed ee Fairivew haddii bukaanku uu haysto qof kaloo lacagta bixiya oo uu Fairview macluumaadka lacagbixiyaha ugu diri waayo waqti hagaagsan taasoo keenaysa in Fairview laga diido.
- Caadi ahaan, haddii bukaanku doorto in uusan caymis ka qaadanin dhanka loo-shaqeeyihiisa haddii ay taasi diyaar u tahay, waxaa laga yaabaa in uusan qofkaasi u qalmin Daryeelka Samafalka ah. Waa in uu qofkaasi dhanka MNsure ka dalbado Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadeed), MinnesotaCare ama Qualified Health Plan.
- Haddii bukaanku doorto in uusan shirkaddiisa caymiska qaansheeg uga dirin hawl gaar ah ama taariikh gaar ah oo adeeg la siiyo, booqashadaas uguma qalmi doono Daryeelka Samafalka ah.

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed Lifaaqa D

Shuruudaha ka reeban Barnaamijka Daryeelka Samafalka ah:

Barnaamijyada Daryeelka Samafalka ah ee Fairview iyo Qorshooyinka kale ee Daryeelka Samafalka ah kuma jiraan waxyaabaha soo socda:

- Bukaanada raaci waaya nidaamka codsashada Daryeelka Samafalka ah waxaa loo diidi karaa Daryeelka Samafalka ah.
- Haddii shirkad caymis ay weli ka fiirsanayso xisaabta bukaanka waxaa la diidi doonaa Daryeelka Samafalka ah haddii codsaduhu uu ka qayb geli waayo dirista dalbashooyinka ama lacag ka soo qaadista dhinacyada kale ee suurogalka ah.
- Adeegyada laga helo adeegbixiyeyaasha aanan Fairview ka mid ahayn, adeeg bixiyeyaasha kale ee Fairview ee aanay siyaasaddani khusaynin.
- Adeegyada laga fuliyo Kiliniigyada Dhakhsada ah ee Fairiview (Fairview Express Clinics).
- Kharashyada ku xiran gaadiidka, ama kharashyada nolosha shakhsi ahaaneed
- Lacagaha ku xiran ku-tallaalidda ee bukaanada ku-tallaalidda ka baxa waqtiga ku-tallaalidda ilaa hal sano ka dib ku-tallaalidda looguma qalmo sicir dhimista Daryeelka Samafalka ah. Talada laga bixiyo hagaajis lagu sameeyo isbeddelladan waa in loo maro nidaamka Ka-reebista Maaliyadeed.
- Dadka Aanan muwaadin u ahayn Maraykanka ama muwaadiniinta Maraykanka ee ku nool meel Maraykanka ka baxsan uma qalmaan Daryeelka Samafalka ah; waxaa tan ka mid ah bukaanada dalkugal ama fiise haysta iyo ardayda waddamada kale. Tan kuma jiraan shakhsiyaadka aanan sharci haysanin ee Maraykanka jooga iyo degganeyaasha aanan haysanin sharciga degganaanshaha joogtada ah.
- Kiliniigyada Keli u Taagan ee Fairview (Fairview Free Standing Clinics) kama qayb qaataan Gargaarka Caafimaadeed ee gobolka ka baxsan. Sidaas darteed, bukaanada lacago lagaga leeyahay kiliniigga keli u taagan ee iyagu haysta caymiska Medicaid ee gobolka ka baxsan uma qalmaan Daryeelka Samafalka ah.
- Adeegyada ay caymis bixiyeyaashu intooda ugu badan u arkaan in aanan la daboolayn haddii aanan loo arkin daryeel caadi ah.
- Sababtoo ah sifada tafaariiqeed ee ganacsiga, siyaasaddan kuma jiraan Qalabka Caafimaadka Guriga ee Fairview (Fairview Home Medical Equipment) iyo Qalabka Tageerada Addimada iyo Addimada Biraha ah ee Fairview (Fairview Orthotics & Prosthetics).
- Daryeelka guriga ee Fairview (Fairview Homecare) iyo Farmashiida Fairview (Fairview Pharmacy) waxay leeyihiin siyaasado Daryeel Samafal ah oo iyaga gaar u ah oo kuma jiraan siyaasaddan.
- Goobaha Fairview ku xiran ee ah ururro ganacsi oo gooni ah ee aanay siyaasaddani khusaynin, ee ay ka mid yihiin, laakiin aanan ku koobnayn, Xarunta Qalliinka Socodka ee Fairview Maple Grove (Fairview Maple Grove Ambulatory Surgery Center), Xarunta Qalliinka ee Crosstown (Crosstown Surgery Center), iyo Cudurka asaasaqa ee Greenview (Greenview Alzheimer's).
- Adeegyada xirfadeed ee laga bixiyo ururrada aanan Fairview ka mid ahayn barnaamijkan kuma jiraan.

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed Lifaaqa E

Barnaamijka Daryeelka Samafalka ah – Fursadaha Kale ee Sicir dhimista ka jira

- Ka-reebisyada Maaliyadeed
  - Maamulka Fairview ee u magacaaban ayaa qiimayn doona ka-reebisyada dhammaantood si ay u go'aamiyaan kartida uu bukaanku u leeyahay in uu lacagta bixiyo. Kiisaska ka-reeban ee ku saabsan oo keliya bukaanada aanan haysanin khayraadka maaliyadeed ee ay lacagta ku bixin karaan ayaa looga shaqayn doonaa oo lagu sheegi doonaa Daryeelka Samafalka ah. Kiisaska kale dhammaantood waxaa looga shaqayn doonaa oo lagu sheegi doonaa hagaajiska maamuleed mana noqonayaan Daryeelka Samafalka ah ama Deynka Xun, sida lagu qeexay tilmaamaha gobolka iyo federaalka. Codsade kaste oo dhaafa tilmaamaha FPL ee lagu leeyahay deyn caafimaadeed oo ku maqan oo wadar ahaan dhaafsan dakhliga guud ee guriga ee sanadkii ugu dambeeyey waxaa laga yaabaa in loo oggolaado in uu Daryeelka Samafalka ah ku Dalbado Ka-reebista Maaliyadeed.
- Rafiiqyada Waayeelka ah:
  - Rafiiqyada Waayeelka ah ee Fairview (Fairview Senior Partners) waa iskaashi dhex mara Fairview iyo Adeegyada Bulshada Waayeelka. Fairview waxay oggolaatay in ay ka dhaafto caymis wadaagyada iyo lacagaha looga jaro isbitaalka iyo kiliniigga. Xubnaha barnaamijkan ku jira waxay fahansan yihiin in ay mas'uul ka yihiin shayada aanan lagu daboolin Medicare, sida daawooyinka guriga loo qaato. Isuduwaha Daryeelka Samafalka ah (Charity Care Coordinator) ayaa xisaabaha isku hagaajin doona. Caddadyada laga soo qaado Medicare waxaa laga jari doonaa hagaajiska lagu sameeyo Daryeelka Samafalka ah.
  - Codsashooyinka is qorista
    - Waxaa codsashooyinka dhammaantood loo diraa oo ka shaqeeya Adeegyada Bulshada Waayeelka ama xafiisyada Gobolka ee fog. Bukaanadu waxay codsasho ama macluumaad dheeraad ah dalban karaan marka ay wacaan lambarka 952-767-0665 ama booqdaan www.seniorcommunity.org wixii khuseeya aagga metro ama www.aeoa.org/senior-services wixii khuseeya Range.
  - Shuruudaha U Qalmista
    - Bukaanadu waa in ay qornaadaan barnaamijka Medicare qaybaha A iyo B oo aanay ku jirin qorshe beddel ah.
    - Ma yeelan karaan siyaadada Medicare.

- Daryeelka Samafalka ah ee Taariikh Hore/Daryeelka Samafalka ah ee Saboolnimada Caafimaadka
  - Haddii bukaanku uu iminka leeyahay MA ama MinnesotaCare oo dhammaan taariikhihii hore ee adeegga aanan lagu daboolayn MA/MinnesotaCare, xisaabta la saaro ka hor taariikhdii oggolaanshaha MA waxaa loogu qalmi karaa Daryeelka Samafalka ah.
- Sicir dhimista Aanan caymis lahayn
  - Ka sokow barnaamijyada ku diyaar ah Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed, degganeyaasha Minnesota iyo Wisconsin ee aanan caymis lahayn ayaa u qalmi doona sicir dhimista aanan caymis lahayn ee laga bixiyo adeegyada isbitaalka ka hor codsashada sicir dhimista Daryeelka Samafalka ah. Sicir dhimistani waxay ku salaysan tahay heshiiska Xeerasha Soo qaadista lacagta ee Xeer ilaaliyaha Guud mana aha barnaamij ka mid ah daryeelka samafalka ah.

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed Lifaaqa F

Qaansheegga iyo Soo Qaadista Lacagaha

- Fairview waxay leedahay siyaasad gooni ah oo ku saabsan Qaansheegga iyo Soo qaadista lacagaha oo ku diyaar ah barta internetka www.Healtheast.org ama www.Fairview.org ama marka Adeegga Macmiilka Fairview laga waco lambarka 612-672-6724 ama 888-702-4073, marka Adeegga Macmiilka HealthEast laga waco lambarka 651-232-1100 ama 1-866-770-6411 ama marka Adeegga Macmiilka Fairview Range laga waco lambarka 218-362-6624 ama 877-390-6624. Waxaa siyaasaddan ku jira macluumaad ka gaar ah oo ku saabsan:
    - Nidaamka Qaansheegga: Fairview waxay bayaannada qaansheegga ku diri doontaa waqtiyada la dejiyey waxayna dadka u qaban doontaa ugu yaraan 120 maalmood ka dib biilka ama qaansheegga ugu horreeya ee booqashada ka dambeeya ka hor inta aanay xisaabta ka bilaabin tallaabooyinka soo qaadista lacagta ee aanan caadi ahayn.
    - Xallinta Xisaabaha: Fairview waxay dadka u qaban doontaa ugu yaraan 240 maalmood si ay xisaabaha furan ugu xalliyaan fursado kala duwan, sida soo ogaanshaha caymiska ama gargaarka caafimaadeed ee loogu qalmo, heshiisyo laga gaaro lacag bixinta, daryeelka samafalka ah ama habab kale.
    - Tallaabooyinka Soo Qaadista Lacagta: Haddii lacagta la bixin waayo, waxay Fairview xisaabaha u gudbin kartaa hay'ado lacagta soo qaada iyo/ama shirkado sharciyeed oo lacagta soo qaada si ay u daba raacaan. Fairview waxay bukaanka ogaysiin u diri doontaa ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta aanay xisaabta ka bilaabin tallaabooyinka aanan caadi ahayn.

Liiska Adeeg Bixiyeyaasha

Fairview waxay liis ka haysaa dhammaan kooxaha adeeg bixiyeyaasha ah ee adeegyada degdegga ah iyo kuwa caafimaadka loogu baahan yahay bukaanada ku siiya xarun ka mid ah Isbitaalka Fairview. Waxaa liiska lagu tilmaamay adeeg bixiyeyaasha ka mid ah iyo kuwa aanan ka mid ahayn Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee Fairview (fiiri isuxiraha halkan ku jira). https://www.fairview.org/search/doctors
ama https://www.healtheast.org/images/stories/billing/covered_providers.pdf

Ansixinta Ururka:

Xarunta Fairview Grand Itasca Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Xarunta Fairview Lakes Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Xarunta Fairview Northland Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Xarunta Fairview Range Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Isbitaalka Fairview Ridges Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka Fairview Southdale Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Xarunta Caafimaadeed ee Jaamacadda Minnesota (University of Minnesota Medical Center), Fairview ayaa siyaasaddan ansixisay.
Isbitaalka HealthEast St. John's Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka HealthEast St. Joseph's Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka HealthEast Woodwinds Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka HealthEast Bethesda Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Kiliniigyada HealthEast iyo ururrada kale ee Canshuurta ka saamaxan ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Ururka Fairview Medical Group ayaa siyaasaddan ansixiyey.

Qofka Siyaasadda iska leh:

Ku-xigeenka Madaxa Wareegga Dakhliga

Waxaa Oggolaaday:

Guddiga Agaasimeyaasha Fairview (Fairview Board of Directors)

Taariikhda(khaha):

Taariikhda Hirgelidda: 2-18-07, Guddigu Oggolaaday

Beddelaysa – Nidaamyada Maaliyadeed ee Qaybta Daryeelka Bulshada ee Guddigu Oggolaaday ee loogu talagalay Adeegyada Bukaanka ee taariikhda 12-16-04

Taariikhda La beddelay: 2/1/15; 12/1/15; 12/29/2015; 1/29/2016, 7/24/2017

Taariikhda Dib loo eegay: Guddiga Fairview ayaa Dib u eegay oo Dib u Oggolaaday: 4/16/15, 6/17/16, 8/17/17

Taariikhda Beddelaadda La hirgeliyey: 6/1/15, 6/17/16, 11/1/17